

XEER GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER Lamb. 39 ee 25 Febarayo 1970

Wax ka Bedelladda Dekreeto lamb. 25 Oktoobar 1969 ee la Xiriira Xeer Nidaamiyaha Garsoorka

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Kadib markii la arkay Baaqa Kaacanka.

Kadib markii la arkay sharciga 1 lamb. 21 Oktoobar 1969.

Kadib markii la garoowsaday faqradda 1 xarafka (d) ee qod. 1 ee dekreetada lamb. 12 ee 25 Oktoobar 1969 ee Golaha Sare ee Kacaanka qeybta amaradda idaariga ah ee la xiriira Xeer-nidaamiyaha Garsoora, iyo faqradda 2aad, xarafka (c) ee Xeer nidaamiyaha Garsoorka oo lagu ansixiyey dekreetada lamb 3 ee 12 Juun 1962 ee isla maadadas khuseeya.

Kadib markii uu ku tala galay soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Cadaaladda iyo Garsoorka iyo Shaqada.

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Waxaa la beddeley faqradda 1 ee xarafka (d) ee Qod. 1 ee Dekreetada Golaha Sare ee Kacaanka lamb 25 ee 25 Oktoobar 1969 ee khuseeya amaradda idaariga iyo nidaamka la xiriira howlwadenadda taakuleynta oo lagu saaray dekreeto ka soo baxay xoghayaha Dowladda ee Garsoorka, Ariimaha Diinta iyo Shaqada.

Qod. 2

Waxaa la beddelay faqradda 2, xarafka (C) ee qod. 28 ee Dekreetada - Sharci lamb. 3 ee 12 Juun 1962 ee Xeer nidaamiyaha Garsoorka, ee habka nidaamka howlwadeenada shaqaalaha hoose waxaa lagu dhisay qod. 51 ee Sharciga lamb 14 ee 11 Maarso 1969 ee Wasaaradda Caddaalada oo soo saaray amaradaan.

Qod. 3

Dekreedani wuxuu hirgeli doona sida ugu dhaqsiga badan.

Muqdisho, 25 Febaraayo 1970.

Madaxweynaha

Golaha Sare ee Kacaanka

SG Mohamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dowladda ee Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

Dr. Osman Nur Ali